



autism
west midlands

Hagaha Otisamka

Waa maxay otisam?

Otisam waa naafo koboceed oo nolosha dhan jirta taasi oo saamaysa qaabka dadku:

- Dadka kale ula xidhiidhaan
- Ula macaamilaan
- U fikiraan oo u dhaqmaan si dabacsan
- U arkaan dareenadooda

Tani waxa ay ka dhigan tahay in dadka qaar qaba otisam ay dhibi ka haysato nolosha maalinaha ah. Inta badan aad ayey u walaacsan yihiin. Qaar badan waxay kala kulmaan isbeddelka adayg. Fahamka saxda ah, dadka qaba otisamka waxay hoggaamin karaan nolol guulaysta.

Otisamku wuxuu ka saameeyaa dadka qaybta garaadeed waxaana jira summado badan oo dadku helaan marka ay baadhis helaan, sida "Otisam ay weheliso Naafonimo Waxbarasho", "Otisamka Shaqaynta Sare" ama "Ifafaalo Cudureedka Asperger". Otisam marmarka qaar waxa loo yaqaan Autism Spectrum Condition (ASC), Autism Spectrum Disorder (ASD) ama the Autism Spectrum. Waxa muhiim ah inaad fahamto in marka qofi uu aad u awoodo ayna ka dhignayn in otisamkiisu mid sahlan yahay. Raadka otisamka ee qof garasho ahaan awood leh wuxuu noqon kara mid aad u kala dhantaala.

Dadka qaba otisamka waxay adkaan kara:

- In adduunku macne u sameeyo
- Inay waxbartaan
- Inay la qabsan karaan xaaladaha cusub
- Inay fahmaan dareenada
- Inay sameeyaan waxyaalaha tooska ah
- Inay sababeeyaan oo go'aano qaataan
- Joogteynta caafimaad maskaxeed fiican iyo faydaqab

Qof qaba otisam hawlaha qaar ayaa u sahlaanaan kara halka kuwa kalena ku adkaan karaan. Tusaale ahaan:

- Qof leh Ifafaalaha Xanuunka Asperger wuxuu guul ka gaadhi karaa saynisyahanka kombiyuutarka iyo qoraa laakiin waxa argagax galin kara ka gudbidda waddada sababtoo ah ma go'aamin karo xawaaraha iyo masaafadda.
- Qof ay waxbarashadu ku adag tahay oo leh otisam waxa dhici karta inaanu awoodin inuu iskii u labbisto laakiin wuxuu awoodaa inuu sameeyo kun qaybood oo halxidhaalaha jigsaw ah xawaare sare isaga oo aan eegayn sawirka sanduuqa.
- Qof kale oo leh otisam shaqayn sare wuxuu jeclaan karaa taariikhda wuxuu si sahala ah u baran karaa taariikha dhammaan boqorrada iyo boqoradaha England, laakiin nasasho kasta iyo qado kasta wuxuu u qaataa iskii sababtoo ah samaysashada asxaabtu waa wax aad u murugsan agtiisa.

Xaqiiqooyin kusaabsan otisamka

- Waa wax la waaraya
- Wuxuu saameeyaa dadka ka soojeeda meelo kala duwan adduunka oo dhan
- Maskaxda qofka leh otisam waxay u kobocdaa una shaqaysaa si ka duwan maskaxda qofka aan otisam lahayn
- Dadka qaba otisam waxay u arkaan, maqlaan, dhandhamiyaan, taabtaan oo u uriyaan adduunka si kale. Waxa kale oo ay saamayn kartaa garashadooda halka ay meel kaga sugan yihiin iyo dheelitirkooda.
- Waxa jira xidhiidh hidde-raac ah otisamka; haddaba wuxuu saamayn karaa ka badan hal xubin qoyska.

Maxaa caawin kara?

- Dheh magaca qofka si uu kuugu soo jeesto
- Luuqad sahlan isticmaal oo sug wakhti uu kuugu jawaabo
- Sharrax xeerarka bulsheed iyo sida loo dhaqmo xaaladaha bulsheed ee kala duwan sida ugu waadaxsan
- Sii qaabdhismeed iyo caadaysi si aad u siiso saadaalin. Tani waxay caawin doontaa walaaca
- Dadka qaar runtii waxa anfacda taageerada arag sida calaamadaha, sawirrada si ay macno ugu kordhiyaan erayga lagu hadlay ama qoran.
- 'Sheekooyinka bulsheed' gacan ayey ka gaysan karaan u diyaarinta qof qaba otisam isbeddel noloshiisa

Danayn gaar ah

Otisam wuxuu sidoo kale ka dhignaan karaa dadka oo la soo baxa karti gaar ah ama shiishka saara waxa ay xiisaynayaan. Tani waxay noqon kartaa wax damac ah ama taban marka heerarka walaacu uu aad u sarreeyo. Hase yeeshee, haddii qofka la fahmayo oo si fiican loo taageero, waxa uu gaarka u xiisaynayo waxa loo jihayn karaa si habboon oo u keenta degganaash, farxad iyo xiitaa shaqo, ka caawiya inuu hoggaamiyo nololo guulaysta.

Waxa jira dad ka gaar ah kuwaasi oo waxa ay gaarka u xiiseeyaan ay tahay hibo dhif ah, tusaale ahaan farshaxan sida Stephen Wiltshire ama saynisyahan sida Temple Grandin.

Otisamka iyo dareemayaasha

Dad badan oo qaba otisam waxa ku adag habaynta macluumaad dareen ee maalin kasta sida jabaqda, aragga iyo urta. Waxay ku yeelan kartaa saamayn qoto dheer noloshu qofka. Isbeddel yar oo bey'adda ah wuxuu u samayn karaa faraq wayn.

Si aadu caawiso, fiiri bey'adda si aad u aragto haddii ay ku abuurayso dhibaato dadka leh otisamka: wax ma ka beddeli kartaa? Markasta isku day inaad diyaar ahaato: u sii sheeg dadka leh otisamka carin dareen oo ay dhici karto inay kala kulmaan bey'ado kala duwan.





Otisamka West Midlands

Waxa jira kabadan nus milyan qof UK oo qaba otisam, naafo aan muuqan, khalad laga fahmay oo cidla jooga. 60,000 ayaa ku nool West Midlands.

Waxa aanu nahay samofalaha hormoodka ah West Midlands ee dadka uu saameeyey otisamku. Waxa aanu u jirnaa inaanu gacan siino dhammaan dadka qaba otisam iyo dadka jecel ee daryeela iyaga si aanu ugu hoggaamino nololo guulaysta. Shaqaalahayaga naxariista leh, ee khabiirada ah iyo mutadawiciintu waxay ka dhax shaqayn dhamaan kooxo da'eedka iyo awoodaha, iyagoo siinaya taageero toos ah dadka uu saameeyey otisam.

Nagala soo xidhiidh

Autism West Midlands
Regent Court
George Road
Edgbaston
Birmingham
B15 1NU

limaylka:

Weydiimaha guud: hello@autismwestmidlands.org.uk

Caawimo iyo talo: info@autismwestmidlands.org.uk

Taleefanka:

Soodhawaynta: 0121 450 7582 • Khadka caawimada macluumaadka: 0303 03 00 111

Websaytka: www.autismwestmidlands.org.uk



Nagala socio Facebook:

Baadh "Autism West Midlands"



Nagala socio Twitter:

@autismwestmids

Hiimiladayadu waa adduun dhammaan dadka otisamkaleh ay haystaan daryeel takhasusu iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay u hoggaamiyaan nolol guulaysata.

Lambarka Diiwaangalinta Samofalaha: 517077

Lambarka Diiwaangalinta Shirkadda: 1953344 (England iyo Wales)